Oslo

# Carruurta oo hesha billow wanaagsan oo ammaan ah

Ma doonaysaa in aad carruurtaada u codsato boos xannaano carruur? Waxaad halkaan ka helaysaa warbixin dheeraad ah oo ku saabsan waxyaalaha ka dhacaxannaanada carruurta.



Somali



## Ciyaartu waa waxbarasho

Ciyaartu qayb muhiim ah ayay uga jirtaa nolosha carruurta. Carruurtu waxay wax bartaan marka ay la ciyaaraan carruur kale. Ciyaarta waxaa lagu bartaa luuqadda, saaxiibtinnimada iyo is qaddarinta. Marka si wadajir ah wax la isugu dayo, wax lagu celceliyo oo firfircooni la wada sameeyo ayay carruurtu bartaan sida dunidu u shaqayso. Xannaanada carruurta waxaan ku samaynaa ciyaaro uroon korriinka carruurta laga billaabo yaraantooda.

## Xannaanada carruurtu waa meel ku fiican barashada luuqadda intaan iskoollada la billaabin

Sanadyo badan ayay qaadataa in luuqad si fiican loo barto, carruurtuna isku mar ayay dhawr luuqadood baran karaan. Waxaa carruurta la fahmaa ayaguna hadalka bartaan marka ay carruurta kale iyo dadka waaweyn la joogaan, la ciyaaraan oo ay la heesaan. Carruurta oo xilli hore xannaanada carruurta billaaba waxay sare u qaaddaa fursadahooda marka ay iskoolka billaabaan.





## Xannaanada carruurtu waxay keentaa billow nololeed oo ammaan ah

Muhiim ayay noo tahay in ilmahaagu ammaan yahay oo xaaladdiisu wanaagsan tahay marka uu xannaanada carruurta joogo. Annaga shaqaalaha ah ee joogna xannaanada carruurta waan xannaanaynaa kuna dadaal naa in aan fahanno carruurta oo dhan, da' kasta iyo luuqad kastaba ha lahaadeene. Adinka waalidka ah ayaan idinla hadalnaa, si wadajir ah ayaanan u helnaa sida ilmahaaga u roon.

## Qof walba waa la soo dhoweynayaa

Xannaanada carruurta qof walba waa lagu soo dhoweynayaa, meel kasta oo aad ka timid iyo luuqad walba oo aad ku hadasho. Waxaa kale oo aan ka shaqaynaa in ay carruurtu yaraantooda bartaan dhaqammada kala duwan. Marka uu qofka barto qofka kale dhaqankiisa, waxay taasi keenaysaa furfurnaan iyo is qaddarin. Xannaanada carruurtu waxay doonaysaa in ay waalidka oo dhan wadashaqayn fiican la lahaato.



Oslo

## Qiime jaban

Haddii uu dakhliga qoyskaagu ka hooseeyo caddad xaddidan, waxaad markaas codsan kartaan in qiimaha la idinka dhimo. Si aad qiime jaban u codsato waa in ilmahaagu marka hore xannaanada carruurta dhigtaa ama aad boos aqbashay.

## Wakhtiyada la codsado booska xannaanada carruurta

Laba jeer ayaa la codsadaa xannaanada carruurta: 1-da maarso iyo 15-ka ogoosto. Laakiin sanadka oo dhan waad codsan kartaa maxaa yeelay xannaanooyinka carruurta qaar baa boos ka bannaan yahay, oo carruur qaata xataa marar ka baxsan wakhtiyada la codsado.

## Ma qabtaa wax su'aal oo xannaano carruur ku saabsan?

La hadal dad ka shaqeeya xaafadda aad ku nooshahay.

**Codso boos xannaano carruur** – warbixin intaan ka badan kaakhriso oslo.kommune.no/barnehage/